

Khuraafaadka la aaminsan yahay Vs. Xaqiiqooyin Ku saabsan Isbeddelada Federaalka ee la xiriira OHP



Tilmaamahani waxay ka hadlayaan khuraafaadka inta badan laga aaminsan yahay isbeddelada la xiriira Medicaid.

Dowladda federaalka ayaa ansixisay sharci cusub oo wax ka beddelaya Medicaid. Oregon dhexdeeda, barnaamijka Medicaid waxaa loo yaqaan Qorshaha Caafimaadka Oregon, ama OHP. Waxyaabo dheeraad ah ka ogow: <https://ohp.oregon.gov/HR1>. Ka dhig macluumaadkaaga mid cusub oo soo sheeg waxyaabaha la iska dhaafayo ama shaqada ama hawlaha loo qalmo: isticmaal koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ama Oregon ONE Mobile oo laga helo <https://benefits.oregon.gov>, Adeega Macmiilka ee ONE ka wac 800-699-9075, ama booqo xafiiska degaanka oo laga helo <https://odhsoffices.oregon.gov>.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP

Khuraafaadka la aaminsan yahay	Xaqiiqda
<i>"Sababta oo ah xeerarka shaqada ama hawsha ee OHP oo aan bilaabmayn ilaa laga gaarayo 2027, ma jiraan wax ii yaala oo aan sameynayo hadda."</i>	Had iyo jeer waa muhiim in aad cinwaankaaga, email-kaaga, iyo lambarkaaga telefoonka ka dhigto mid cusub oo aad ka soo jawaabto warqad kasta si aysan waxba kuu dhaafin. Haddii ay xeerarku ku khuseeyaan, waxaad ogeysiin heli doontaa Sibtambar 2026 iyo saddex bilood ka hor dib u cusbooneysiintaada. Waxaad sidoo kale xaaladaada ka fiirin kartaa koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ama app-ka Oregon ONE Mobile oo laga helo https://benefits.oregon.gov oo bilaabmaya Noofambar 2026.
<i>"Haddii hal qof oo tirsan qoyska laga dhaafo ama uu buuxinayo xeerarka, qoyskayga oo dhan waa mid la daboolayo."</i>	Mid daruuri ah maaha. Haddii dad badan oo ka tirsan qoyskaaga ay tahay in ay buuxiyaan xeerarka, waxaa loo eegi doonaa si gaar ahaaneed. Ogeysiintani waxay kala caddeyn doontaa qofka laga dhaafay iyo qofka u baahan kara in uu qaado tallaabo dheeraad ah. Hal qof oo u qalmaa si toos ah uma daboolayo dadka kale ee isla qoyska ka tirsan. Si kastaba ha ahaatee, qoyskaagu wuxuu buuxin karaa xeerarka leh dakhliga isku dhafan ee ah \$580 bishii. Qoyskaaga waxaa ka mid ah qofka aad isqabtaan, carruurtaada iyo qof kasta oo kale oo aad ku qorto cashuur celintaada.
<i>"Waa in aan haystaa shaqo lacag bixinaysa si aan u buuxiyo xeerarka."</i>	Maya, uma baahnid in aad haysato shaqo lacag bixinaysa. Waxaa jira siyaabo badan oo lagu buuxiyo xeerarka, oo ay ku jiraan in dakhli la yeesho, in dugsiga lagu jiro ugu yaraan waqtiga barkiis, ama laga qayb qaadayo hawlo isku darkoodu noqonayo ilaa 80 saacadood bishii. Shaqada, dugsiga, tabarucaada, iyo tababarku dhammaantood waxaa loo xisaabinayaa. Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa wax la iska dhaafayo, kaasi oo ka dhigan in aad haysato sabab aadan ugu baahnayn in aad buuxiso xeerarka.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. OHP kala xiriir one.communications@odhsos.oregon.gov.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP Ayaa wali lagu jiraa

Khuraafaadka la aaminsan yahay	Xaqiiqda
<i>"Haddii ay jiraan laba qof oo waaweyn oo jooga gurigayga, mid kasta oo inaga mid ah waa in uu sameeyo \$580 bishii si uu u buuxiyo xeerarka."</i>	Maya. Qaddarka lacageed oo dhan \$580 wuxuu ku saleysan yahay dhammaan dakhliga qoyska ee bisha, ma aha qof kasta dakhligiisa si gaar ah. Qoyskaaga waxaa ka mid ah qofka aad isqabtaan, carruurtaada, iyo qof kasta oo kale oo aad ku qorto cashuur celintaada. Haddii aad haysato \$580 oo ah dakhliga qoyska bishii, uma baahnid in aad xeerarka u buuxiso siyaabo kale. Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in ka soo jawaabto dhammaan su'aalaha ku qoran codsiga, oo ay ku jiraan dhammaan hawlaha wax loogu qalmo ee suurtagalka ah.
<i>"Nooc kasta oo tabarucaad ahaan loo qabto waa lagu xisaabinayaa xeerarka."</i>	Ma aha in dhammaan waxa tabaruc ahaan loo qabto la xisaabiyo. Hawsha tabaruca ah waa in ay qayb ka tahay barnaamij abaabulan oo leh hay'ad dadweyne ama hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo la socota saacadahaaga oo xaqiijin karta haddii la weydiyo. Saacadaha tabarucaadu ma noqon karaan hawlo xisbi gaar ahi leeyahay ama faa'iido u leh shakhsiyaad gaar ah, sida tabarucaada ololaha mas'uul la soo doorto.
<i>"Waxyaabaha la iska dhaafayo waxaa si toos ah loogu dabaqaa qof kasta oo u qalma."</i>	Waxay ku xiran tahay waxa la iska dhaafayo iyo haddii macluumaadkani hore ugu jiray faylkaaga. Sida caadiga ah, OHP waxay hore u haysataa macluumaad ku saabsan da'daada, haddii aad hesho faa'iidooyinka qaarkood sida Caymiska Naafanimada Social Security-ga (SSDI), Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI), ama Medicare, haddii aad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska, iyo xaaladaha caafimaad qaarkood. Waxaa dhici karta in aad u baahan tahay in aad soo sheegto waxyaabaha la iska dhaafayo ee kale oo u sheegto OHP in ay ku khuseeyaan, oo bixiso caddeyn. Waxaad ogeysiin ku heli doontaa qiyaastii saddex bilood ka hor dib u cusbooneysiintaada oo kuu sheegaysa waxa aad u baahan tahay in aad bixiso.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP Ayaa wali lagu jiraa

Khuraafaadka la aaminsan yahay	Xaqiiqda
<i>“Waxyaabaha laga dhaafayo daryeel bixiyuhu waxay daboolaan qof kasta oo daryeelaya qof kale.”</i>	Waxaa dhici karta in aad u qalanto wax la iska dhaafayo haddii aad daryeesho ilme yar oo da’diisu ka yar tahay 14 jir ama qof kale oo da’kasta leh oo qaba xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa. Haddii aad la nooshahay qofkaasi ama aad qaraabo tihiin, kaliya u sheeg OHP adiga oo soo sheegaya macluumaadkaaga. Haddii aadan qaraabo la ahayn iyaga oo aadan la noolayn, waxaad u baahan tahay in aad bixiso ugu yaraan 80 saacadood oo ah daryeel bishii oo aad siiso qofkaasi si aad ugu qalanto. Haddii aad daryeelayso qof aanan kula noolayn oo aan qaraabo kula ahayn wax ka yar 80 saacadood, waad ku xisaabin kartaa saacadahaaga daryeel bixinta oo lagu daray hawlaha kale ee wax loogu qalmo. Waxaad ogeysiin ku heli doontaa qiyaastii saddex bilood ka hor dib u cusbooneysiintaada oo kuu sheegaysa waxa aad u baahan tahay in aad bixiso.
<i>“Marka xeerarku bilaabmaan, waa in aan soo diraa caddeynta dakhligayga, hawlahayga, ama waxyaabaha la iska dhaafayo bil kasta ama waxaan lumin doonaa caymiska.”</i>	Maya. OHP ayaa dib u eegi doonta kiiskaaga marka u horreysa ee aad codsato ama ka hor dib u cusbooneysiintaada xigta. Haddii aad tahay qof wax codsanaya oo cusub oo aan u baahanahay caddeyn, waxaanu codsan doonaa iyada marka u horreysa ee aad codsato. Haddii aad hadda ka tirsan tahay OHP, waxaad heli doontaa ogeysiin ay la socdaan tilmaamo la raacayo qiyaastii saddex bilood ka hor dib u cusbooneysiintaada. Si aad u xaqiijiso in OHP kula soo xiriiri karto, waxaad macluumaadkaaga ka cusbooneysiin kartaa dhanka internet-ka ama isbeddelada ku soo sheeg koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ama App-ka Oregon ONE Mobile oo laga helo https://benefits.oregon.gov, telefoon ahaan oo laga helo 800-699-9075 (wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa), ama si shakhsi ahaaneed oo ah xafiiskaaga degaanka ODHS (mid ka hel https://ODHSoffices.oregon.gov). Waxaad sidoo kale caawimaad ka heli kartaa kaaliyaha OHP (mid ka hel https://OregonHealthCare.gov/GetHelp).

Dib u cusbooneysiinta, Caawimaada Biilashii Hore, iyo Lacagaha Co-Pay-ga

Khuraafaadka la aaminsan yahay	Xaqiiqda
<i>“Laga bilaabo dabayaaqada 2027, qof kasta oo ka tirsan OHP waa in uu dib u cusbooneysiiyaa lixdii biloodba mar.”</i>	Qof kasta maaha. Laga bilaabo dabayaaqada 2027, dadka waaweyn qaarkood ee da’doodu tahay 19 ilaa 64 jir waxay dib u cusbooneysiin doonaan lixdii biloodba mar. Qof kasta oo kale, oo ay ku jiraan carruurtu, dadka haysta Medicare, dadka haysta OHP ku saleysan naafanimo, iyo kuwa ah Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska (iyada oo aan la eegayn da’dooda) waxay dib u cusbooneysiin doonaan hal mar sanadkii halkii ay ka ahaan lahaayeen labadii sanaba mar.
<i>“Mar dambe ma heli karo caawimaad la xiriirta biilashii caafimaadka ee hore.”</i>	Xubnaha cusub ee OHP iyo dadka dib u codsada ka dib marka ay dhammaadaan faa’iidooyinkoodii OHP, caawimaada la iska siiyo biilashii caafimaadka ee hore, oo sidoo kale loo yaqaan “retroactive coverage,” ayaa sii yaraanaysa. Laga bilaabo Janaayo 1, 2027, inta badan dadka waaweyn ee da’doodu tahay 19 ilaa 64 jir ee aan u qalmin OHP ku saleysan naafanimo ama uur lahaansho waxay heli doonaan hal bil oo caymis ah oo loogu talagalay biilashii caafimaadka ee hore, halkii ay ka ahaan lahaayeen ilaa saddex. Qof kasta oo kale, oo ay ku jiraan carruurtu, dadka ka weyn 65 jir, iyo dadka uurka leh ama haysta OHP ku saleysan naafanimo, waxay heli doonaan ilaa laba bilood.
<i>“Dhawaan waxaan ku qabsanaan doonaa in aan bixiyo kharash lacageed si aan daryeel u helo.”</i>	Laga bilaabo Oktoobar 2028, dadka waaweyn qaarkood waxay u baahan doonaan in ay bixiyaan kharash lacageed oo yar oo loogu talagalay noocyo daryeelka caafimaad qaarkood. Tani waxaa loo yaqaan “copayment” ama “copay”. Kharashyadani ma khuseyn doonaan dadka waaweyn ee haysta Medicare ama OHP ku saleysan naafanimo ama dadka leh dakhli ka hooseeya \$15,000 sanadkii. Lagaagama baahnaan doono in aad bixiso kharashyada lacageed ee loogu talagalay baaritaannada, daryeelka xaalada degdega ah, ama daryeelka caafimaadka dhimirka. Kharashyadani sidoo kale ma khuseyn doonaan daryeelka dhalnada ka hor, daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka, ama daryeel ka jira rugaha caafimaadka bulshada.

Healthier Oregon, Xaalada Muhaajirnimo, iyo U qalmida

Khuraafaadka la aaminsan yahay	Xaqiiqda
<i>“Dowladda federaalku waxay joojinaysaa Medicaid-ka loogu talagalay dadka leh xaaladayda muhaajirnimo, markaa waa in aanan codsan.”</i>	Oregon waxay leedahay barnaamij loo yaqaan Healthier Oregon oo bixiya faa’iidooyinka OHP oo buuxa iyada oon la eegayn xaaladaada muhaajirmimo. Haddii aad hayso su’aalo ku saabsan xaaladaada, hawl wadaagaha bulshada oo ay aqoonsan tahay OHP ayaa wax caawin kara (mid ka hel https://OregonHealthCare.gov/GetHelp).
<i>“Haddii aan ku jiro Healthier Oregon, waxaa hubaal ah in aanan buuxinayn xeerarka shaqada ama hawsha ee OHP.”</i>	Maya. Xubnaha ka tirsan Healthier Oregon ee da’doodu tahay 19 ilaa 64 sano jir waxay u baahan doonaan in ay dhammeystaan xeerarka shaqada ama hawsha haddii aysan lahayn wax loo qalmo oo la iska dhaafayo oo ay saameyn ku yeelan doonaan isbeddellada kale sida dib u cusbooneysiinta joogtada ah.
<i>“Waxaan ku jiraa Healthier Oregon waxaanan u wareegayaa Open Card sanadka 2027. Uma baahni in aan wax sameeyo si aan isku diyaariyo.”</i>	Mid daruuri ah maaha – waa muhiim in wax la sii qorsheysto. Caymiskaaga iyo faa’iidooyinkaagu waxay ahaanayaan sidoodii hore, laakiin dhakhaatiirta iyo rugaha caafimaadka ee aad arki karto way isbeddeli karaan haddii aysan qaadan OHP Open Card. Weydii daryeel bixiyayaashaada caafimaadka ee hadda jira haddii ay qaataan OHP Open Card ama booqo https://ohpopencard.org si aad u hesho mid sidaasi sameysa.